

DATUM
2023-01-25

Isku xiriirinta qoshaha shakhsiga (SIP)

Markaad u baahan tahay in lagaa caawiyo caafimaadka iyo daryeelka jirrada ee la xiriira xaaladdaada nololeed, ee Skåne iyo degmadaadaba waxaa laga yaabaa in dadaalada la bixinayo loo baahdo in laysku xiriiriyo. Dadaalada waxaa laysugu xiriirin karaa iyada oo loo marayo Isku xiriirinta Qorsha Shakhsiga (SIP). SIP wuxuu qeexayaa qofka mas'uulka ka ah dadaaladaas. Si SIP loo hirgeliyo waxaa adiga lagaaga baahan yahay inaad oggolaansho bixiso.

Waa maxay SIP?

SIP waxa loo fulinayaa sida shir ay dadka mas'uulka ka ah dadaalada la bixinayo ay si wadajir ah kuula qorshaynayaan adiga sidee dalaalada la bixinayo loo fulinayaa oo loo dabageleyaa. Waxaad tahay qof firfircoon oo ka qaybqaata qorshaha. Meesha laga ambaqaadayo SIP waa maxay tahay waxa adiga kuugu muhiimsani. Dadaalada la bixinayo waa laysku xiriirinayaa oo loo qorshaynayaa iyadoo lagu salaynayo hadafkaaga gaarka ah.

Ujeeddada SIP

Ujeeddada SIP waa in aad hesho dadaalada la bixinayo ee xaalada noloshada aad uga baahan tahay ee aad xaqa u leedahay oo isku dubaridan. Hadafku waa in aad hesho taageero iyo caawimo si aad ugu noolaato nolol caadi ah oo madaxbanaan intii suurtagal ah.

Sidee loo sameeyaa SIP?

Marka la samaynayo SIP, dadka ka mas'uulka ah dadaalada kala duwan ee la bixinayo ayaa kula shiraya adiga si loo qorsheeyo sida loo fulinayo. Dadka ka qaybqaadanaya shirka waxay ku xidhan tahay hadba sida ay baahiyahaagu u eg yihiin. Haddii aad rabto, waxaad sidoo kale soo kaxaysan kartaa qof qaraabo ah. Shirku wuxuu ka dhici karaa, tusaale ahaan, gurigaaga, xarun caafimaad ama meel kale oo ku habboon. Waxaa lagu siinayaa qorshaha oo dhammaystiran oo warqad ku qoran sidoo kale waxaad ka heli kartaa adigoo geleya Mina ee qorshayaasha daryeelkaaga bogga 1177.

In la ogaadaa way fiican tahay

Haddii adiga, ama qaraabadaadu, aad rabtaan inaad wax badan ka ogaataan ama aad rabtaan in laydin siiyo caawimo ku saabsan diyaargarowga, fadlan annaga na soo waydiiya ama macluumaad dheeraad ah ka raadsada bogga 1177.se
Haddii qofka laga rabo inuu oggolaanshaha SIP bixinayaa uu ka yar yahay 18 sano, markaa heerka qaangaarnimada qofka ayaa go'aaminaysa inuu qofkaas ama mas'uuliyiintiisu ay tahay inay bixiyaan oggolaanshaha.